MAXAA HORTAAGAN DAWLADNIMADA SOOMAALIYA?

Soomaaliya & Itoobiya, iyo Danaha is-diidan ee Reer Galbeed

Qoraha: Abdiweli Hassan Mohamed

(abdihass55@hotmail.com)

Qoraalkan hoose waa qayb ka mid ah buug, haddii Rabbi idmo, soo bixi doona goor dhow, kaasoo ka hadlaya guud ahaan taariikhda Soomaaliya, gaar ahaanna **'waxyaabaha hortaagan dawladnimada Soomaaliya'**. Buuggani wuxuu si faahfaahsan uga hadlayaa xilliyadii ka hor guumaysigii reer Yurub iyo qaababkii dhaqan-dhaqaale, bulsho, maamul iyo xadaarad ee ka jiray Soomaaliya; waqtigii guumaysigii reer Yurub iyo sidii ay heshiisyada khiyaanada ku dhisan ula galeen qaar ka mid ah beelaha Soomaaliyeed, halgankii gobonnimadoonkii xorriyadda, uu ugu caansanaa Sayid Maxamed Cabdille Xasan, dawladihii waqtigii xoriyadda, dagaalkii 1977-78 ee Soomaaliya & Itoobiya oo ilaa xad dhammaystiran; iyo waqtigii dagaallada sokeeye. Buuggu wuxuu, sidoo kale, aad u falanqaynayaa faragelinta shisheeye iyo arrimaha aan wali la fahmin ee hortaagan dawladnimada Soomaaliya sida Tartanka aqoonsi-siyaasadeed ee qaab-dawladeedka reer Galbeedka iyo qaab-dawladeedka dadka Soomaalidu doonayaan. Wuxuu ka hadlayaa xalka Geeska Afrika guud ahaan, iyo gaar ahaan Soomaaliya, iyadoo qoraagu ku soo bandhigayo inay macquul tahay is-kaashi dhaqan-dhaqaale inuu dhex mari karo Soomaaliya iyo Itoobiya iyo guud ahaan Geeska Afrika, faa'iidooyinka laga helayo arrintaas, iwm.

QARNIGA 21-AAD & GEESKA AFRIKA: SOOMAALIYA IYO ITOOBIYA.

Hordhac.

Qeexidda macnaha Geeska Afrika ee Qarnigan 21-aad way ka duwan tahay tii qarniyadii ka horreeyay**.** Waxay qeexiddu noqonaysaa mid dhul-ahaan, dhaqaale ahaan iyo siyaad-bulsho ahaan ku xirnaatay dawladda/ha caalamka hoggaamiya, maadaama ay doonayaan in danahoodu ka fulaan gobolkan. Haddaba, dadyowgii ama qowmiyadihii qarniyada badan ku noolaa gobolkan ee ay soo dhexmareen dagaalo joogta ah, kuwaas oo ku

salaysnaa diin, dhul daaqsiimo/beereed, awood xukun iyo arrimo kale, waxay noqatay in kuwana dawladihii ka jiray ay bur-buraan, kuwa cusubna samaysmaan, isla markaana kuwii hore u jiray qaarkood ay helaan fursad qaali ah oo ay ku qabsadaan kuwii burburay. Arrintan waxaa aad u kaalmeeyay dagaalka ku saabsan maamulidda saliidda caalamka ee dawladaha reer galbeedku u adeegsadaan magaca "Argagaxiso", si ay awood ugu hantiyaan khayraadkaas iyo goobaha istiraatijiyadda u leh ganacsigiisa.

Burburkii dawladdii dhexe ee Soomaaliya ee sannadkii 1991-kii waxay muujisay in arrinta isku haysadka xuduudo iyo dhulal ee gobolkan ay ka durugsan tahay kana qoto dheer tahay sidaas. Waxay muujisay in colaadda ka dhaxaysa Soomaaliya iyo Itoobiya ay ka fog tahay dhul iyo xuduudyo la isku haysto. Waxay muujisay in dagaallada labada dhinac ay ahaayeen kuwa ku saabsan waddan is-fidinaya iyo mid is difaacaya si uu u sii jiro. Aqoondarrada ka haysatay caalamka in arrintu sidaas tahay, ayna ku koobayeen kaliya in mushkiladdu ahayd isku haysadka xuduudihii waddamadii guumaystayaashii reer Yurub, waxaa la dhihi karaa waxaa ugu wacnaa qaabka iyo heerka ay gudaha u dhexgaleen dhulalka Geeska Afrika markii ay guumaysaneyeen intii u dhaxaysay bartmamihii qarnigii 19-aad iyo bilowgii qarnigii 20-aad. In kasta oo awoodda milatari ee Reer Yurub ay sii murgisay, dhibaato abuurtay, isla markaana ay saamayn wayn ku yeelatay siyaasadda Geeska Afrika, haddana saamayn wayn kuma samayn dhinacyada dhaqan-dhaqaale, iyo bulsho marka loo barbar dhigo sida ay saamaynta wayn ugu sameeyeen Qaaradda Afrika inteeda kale. Dadka Geeska Afrika si aad u adag ayay uga horyimaadeen Guumaystayaashii reer Yurub. Waxaa la dhihi karaa waxaa sabab u ahaa saamayntii hore u soo gaariddii Diinta Islaamka ee gobolka ka hor intaysan ku fidin caalamka kale, taasoo ku dhiiro-gelisay iska caabitinta guumaysiga. Sidaas darteed, qayb ballaaran oo waddamada Geeska Afrika ah uma suurtoobin in Guumeysigii reer Yurub uu gudaha u galo sida: qayb ballaaran oo Suudaan ah, dhulka gudaha Soomaaliya iyo inta badan Itoobiya. Taas waxaa laga dheehan karaa xagga waddooyinka, iyo is-gaarsiinta kale oo aan goobahaas Guumaysigu ka samayn halka uu Afrika inteeda kale ka sameeyay. Waxaa jira qaybo yar oo Geeska Afrika ah oo guumaysigii reer Yurub saamayn ku sameeyay sida: Jabuuti, Jesiira (Suudaan), Eritereeya, iyo Dhulalka ku yaal Xeebaha Soomaaliya.

Haddaba, Gobolkan oo dadyowgiisu qarniyo badan loolan dheer ka soo dhexeeyay, ayaa bilowgii soo gelitaankii Guumaysigii reer Yurub ee gobolkan waxay ku soo aaday is-fidintii Itoobiya markii uu maamulayay Menilik II. Taasi waxay keentay in dagaallo aad u qaraar ay ka dhacaan gobolka, isla markaana aad u sii fogeeyay colaaddii iyo dhibaatadii hore uga jiri jirtay gobolka qarniyada badan. Waxay keentay in si fiican arrintu isugu sii badasho weji diimeed, maadaama Itoobiya iyo shucuubta dagaalku ka dhaxayn jiray ay kala ahaayeen Kobtik-Kiristiyaan iyo Muslimiin. Taasi oo markii reer Yurub oo Kiristaan ahaa ay yimaadeen ay la safteen Itoobiya, isla markaana arrintan si aan gabasho lahayn uu Menilik II u sheegay reer Yurub inuu Harar ka saaray Amiirkii maamulayay, isla markaana aan Kiristaan dambe lagu dhibaatayn doonin (eeg qaybta 1-aad, warqaddii hambalyada ee Menilik qoray).

Dhinaca kale saamayntii loolan ee ka dhexeeyay quwadihii reer Yurub ee gobolkan guumaystay waxay keentay inaan hal quwad ama isbahaysi uusan ku xoog badan, isla markaana uusan gobolku siyaasaddii caalamka dhinacna u xoog badan. Tani waxay ku noqotay gobolka, iyadoo ilaa maantadan qarniga 21-aad taagan, mid mar walba quwadihii reer galbeedku isku hor fadhiyaan siyaasad iyo dhaqaale ahaan, oo aan wax horumar ah laga samayn karin gobolkan. Qaybaha kale ee Afrika iyo “Dunida Saddexaadba” quwadihii reer Yurub waxay ka fogeeyeen tartankii dhexdooda ahaa, iyagoo mid walba uu toos u guumaystay waddankii uu ku soo horumaray, sidaasna waddan walba uu meel toos ama isbahaysi toos ah hoos tago dhaqaale, siyaad iyo bulsho ahaan ilaa maanta.

Maxay tahay sababta keentay in waddan kasta ee Geeska Afrika uu tartankii quwadihii reer Yurub uga badbaadi waayay? Maxay waddamadii Reer Yurub isugu dhaafi waayeen mid walba waddankii uu ku soo horumaray, oo hal waddan kasta la isugu qabsaday?

Maxayse tahay sababta Soomaaliya ka dhigtay midda dhibaatada ugu wayn ee tartankaas quwadaha reer Yurub ugu saamaynta badnaa?

Sababtu waa Kanaalka Suways iyo Marinka Badda Cas, iyo Soomaaliya oo ah dal wada muslimiin ah oo halkaas ku nool. Laakiin maxaa qaab heshiis ah loogu isticmaali waayay, oo waddan walba oo reer Yurub ah loogu dayn waayay hal waddan inuu

Guumaysto, sida Soomaaliya maxaa loogu qaybiyay shan qaybood? Soomaaliya waa dal wada wadaaga diinta islaamka, dhaqan, Af-Soomaali, dhaqan-dhaqaale, kuna wada nool dhulka ugu ballaaran ee Geeska Afrika. Sidaas darteed, dadka intaas wadaaga ayna dagaal qarniyaal badan socday ka soo dhaxaysay Kiristaanka ku nool Itoobiya oo kaashanayay kuwa reer Yurub waxay keenaysay haddaan la qaybin inay noqonayaan awood wayn oo mar walba khatar ku ah marinka Kanaalka Suways ee Badda Cas. Tan kale waa iyadoo quwadihii reer Yurub ay mid walba doonaysay inay saldhig ka ag dhow marinkaas ka samaysato Soomaaliya, si ay danaheeda u ilaashato.

Iyadoo taasi jirto ayaa tartanka ka dhexeeyay reer Yurub uu saamayntii ugu wayn ku reebay qaabkii samaysankii qaab-dawladeedyadii ka hirgalay Geeska Afrika, ka hor intii aysan ciidamo ahaan uga bixin dhulalkaas sannakii 1960-kii. Maxsuulku wuxuu noqday in u soo dhoofintii qaab-dawladeedkii reer Galbeedka ee Geeska Afrika uu ahaa mid iska muuqaal guud ah balse aan si hoose u sii saamayn qaab-dawladeedkii waddamadaas u samaysmay. Tani oo ka duwan qaybaha kale ee dunida waddamadii reer Galbeedku guumaysteen. Sidaas darteed, nidaamyadii hore uga jiri jiray dhulalka Geeska Afrika ayaa waxay noqdeen kuwa saldhig u ahaada saldhigga aqoonsiga siyaasadeed, bulsho iyo dhaqaale ee dadyowga gobolka. Waxayna tani hor istaagtay in maamulladii samaysmay xoriyaddii 1960-kii ay dhaqan geliyaan nidaam-dawladeedkii ay hore u samayn waayeen guumaystayaashii reer Yurub markii ay ayagu ciidan, dhaqaale, iyo aqoon ahaanba ay halkan ka talinayeen. Is-horjoogsigaas ay shucuubta Geeska Afrika sameeyeen, gaar ahaan Soomaaliya, waxay keentay in xukuumadihii fulinayay nidaam-dawladeedyada reer Yurub, ee dabinka ku dhisan, ay markii horeba wiiqmaan, shaqayn waayaan si kasta oo reer Yurub u garab istaagaan, kaddibna burburaan. Hirgelintii Qaab-dawladeedka Reer Yurub sidaas ayuu mar labaad uga hirgali waayay dhulka Geeska Afrika. Su'aashu haddaba waxay tahay waa maxay faa'iidada laga helayo mar kale isku dayga ku beeritaanka qaab-dawladeedka reer Yurub ee Geeska Afrika? Soomaaliya muddo 20 sano ah ayay hadda dawlad dhexe oo waddanka ka wada talisa la'dahay. Waxay Soomaalidu diidan tahay in mar saddexaad la isku dayo ku beeritaanka dhulkooda nidaamka khiyaanada iyo dabinka ku salaysan ee qaab-dawladeedka reer Yurub. Tartanka ka dhexeeya nidaamka dadka Soomaaliyeed doonayaan oo ah kan ku salaysan Shareecada Islaamka iyo dhaqanka toosan ee soo jireenka ahaa ee dadka Soomaaliyeed, iyo qaab-

dawladeedka khiyaanada iyo dabinnada ku salaysan ee reer Yurub wuxuu dhaxalsiiyay Soomaaliya inay iska caabin joogta ah ku jirto. Waxaa ilaa hadda u socda ummadda Soomaaliyeed halgan 200 sano gaaraya oo ay ku hortaagan yihiin inuu nidaamka soo dhoofinta ah ee reer Yurub ka hirgalo dhulkooda, sida uu uga hirgalay dhammaan qaaradda Afrika, iyo inta badan caalamkii ay reer Yurub guumaysteen.

Mushkiladda Soomaaliya, iyo guud ahaan Geeska Afrika waxay salka ku haysaa labadan qodob:

1. Dhul-ballaarsiga iyo is-fidinta awoodeed ee Itoobiya ku hayso ummadda Soomaaliyeed, iyo Soomaalida oo is-difaacaysa;
2. Soomaalida oo diidan muddo labo qarni ah in ilaa hadda dhulalkooda laga hirgeliyo qaab-dawladeedka reer Yurub.

Tartanka aqoonsi-siyaasadeed ee qaab-dawladeedka reer Galbeedka iyo qaab-dawladeedka dadka Soomaalidu doonayaan.

Humaagga saldhigga qaab-dawladeedka Waddamada Reer Galbeedka wuxuu u muuqdaa mid aan ka hirgalayn Geeska Afrika. Humaaggaas oo si caddaan ah uga hirgalay qaybaha kale ee Qaaradda. Arrimaha humaaggan asalka u ah waxaa ka mid ah: dastuurka waddanka, dhisidda nidaamyada haga qaab-dhismeedka iyo hawlaha dawladda. Dhammaan arrimahani waa kuwa asalka u ah nooca ‘Dimoqraadiyadda’ reer galbeedka, taasi oo si aan ka dood lahayn looga ictiraafay caalamka guud ahaan, iyadoo lagu dhiso saldhigga dawladnimada waddan kasta. Ujeeddada humaagga qaab-dawladeedka Reer Galbeedka waxay asal ku leedahay taariikhda loolankii ka dhaxayn jiray Kaniisadaha reer Yurub iyo dhaq-dhaqaaqyo soo caan baxay oo isbedel doon ahaa, kuwaas oo u arkay in hoggaanka iyo nidaamka kaniisaddu hogaamiso uu yahay mid dib-u-dhac ah oo aan ogolayn isbedel iyo horumar. Loolankaasi wuxuu keenay in ay dhacaan dagaallo xooggan oo dhinac kasta leh sida: qaab militari, dhaqaale, fikir, iyo bulsho. Waxay noqotay inay guulaystaan dhaq-dhaqaaqyadii casriga ahaa, ayna u hawl-galaan sidii ay ku fidin lahaayeen mabaadii’da casriyaynta ku dhisan. Sababaha ay uga guulaysteen kaniisadda way badan yihiin, laakiin waxaa ugu muhiimsanaa iyadoo lumisay taageeradii dadku u hayay, maadaama ay boqorradu ku fushan jireen danahooda, isla markaana abuurtay

dabaqado burjuwaasi ah oo kaniisaddu saldhig u tahay. Waxay u kala baxeen dad leh dhammaan hantida oo idil sida dhulka, xoolaha iwm, kuwaas oo kaniisaddu taageerto, iyo dad lagu shaqaysto oo dabaqaddaas u shaqeeya. Waxaa lumay caddaaladdii laga sugayay kaniisadda iyo mabaadii'dii diimeed ee ay sheeganaysay inay hawlaheeda saldhig u yihiin. Haddaba, dhaq-dhaqaaqaas *casriyaynta* la magac baxay wuxuu hirgaliyay in kaniisadda laga wareejiyo talada hoggaaminta iyo saldhigga hagidda mabaa'diida maamulka. Waxaa abuurmay qaab-maamul la magac baxay sekulaarisim ama calmaaniyad. Nidaamkani oo aad u macno ballaaran wuxuu qabsaday maanka iyo maskaxda dadkii reer Yurub iyadoo markii dambana si xoog ah looga hirgaliyay kaddib kacaankii Faransiiska.

Haddaba, qaab-dawladeedkani wuxuu aaminsan yahay in qaab casri ah dadka loo ilbixiyo loona marayo qaab-cilmaani ah. Yaa fulinaya?

Waxaa loo abuuray qaab-dawladeed la magac baxay 'Qaran', kaasoo hirgalinaya nidaamka cilmaaniga ah, ayna kaabayaan ururada la magac baxay 'bulshada rayidka' ah sida: 'hay'adaha warfaafinta: raadiyaha, teleefishinka, wargaysyada, iyo buugaag'; 'hay'adaha xuquuqda insaanka (bani'aadmiga); iyo kuwa keleba.

Qaab-dawladeedkani waxaa looga hirgaliyay dunida aan reer Yurub ahayn qaab-guumaysi oo qarniyo badan socday. Waxaase la yaab noqotay markii dhaq-dhaqaaqyadii isbedelka casriga waday ee la dagaalamay kaniisadaha Yurub ay u yimaadeen duni fara badan oo aan diinba haysan. Maxay sameeyeen?

Waxaa la filayay maadaama ay diinta/kaniisadda u arkayeen mid dib-u-dhac ah inay hawshoodii casriyaynta iyo cilmaaniyadda ah hore ugu fulinayaan waddamadan ay guumaysiga ugu yimaadeen. Ma aysan yeelin saas balse waxay u keeneen laba buug: mid kaniisadda ka socda oo baybalka ah iyo mid cilmaaniyadda ah oo qaab-dawladeedka reer Yurub ah. Sababtu maxay tahay?

Dadyowga cawaanta ahaa ee ay reer Yurub guumaysiga ugu yimaadeen waxay haysteen diimo aan samaawi ahayn oo aad uga fog xagga xadaaradda iyo isbedel casri ah. Si haddaba ay ugu fududaato is-fahamka iyaga iyo dadkan waxay noqotay in diimahoodii loogu badalo diinta Kiristaanka balse aysan saamayn ku yeelayn qaab-dawladeedka ay fidinayaan.

Maxay kala kulmeen, sideese ula dhaqmeen dadyowgii Muslimiinta ahaa ee ay reer Yurub guumaysiga ugu tageen?

Siyaabo kale duwan ayaa loo wajahay, laakiinse meel kasta oo dadyowga muslimiinta ah ku noolaayeen waxay kala kulmeen dagaal iyo iska caabin xooggan oo qarniyo socotay.

Hase yeeshee, inta badan waddamadaas muslimiinta ah, in kasta oo ay hor istaageen haddana nidaamkii qaab-dawladeedka reer Yurub ilaa xad wuu ka hirgalay. Hase yeeshee, Soomaaliya kama hirgelin, sababtana waa taan kor ku soo xusay oo waddamadii guumaysiga u yimid ee reer Yurub waxay ku tartameen arrimaha Soomaaliya, ilaa haddana qarniga 21-aad socota, halka waddamada kale ee muslimiinta inta kale waddan kasta hal waddan oo reer Yurub ah guumaystay, sidaasna uu waddankaas reer Yurub ah fursad ugu helay inuu nidaamka qaab-dawladeedka waddankiisa ku fuliyo.

Maadaama Soomaaliya ay wali hortaagan tahay nidaamka reer Yurub, lagama harin oo lama oran ha loo daayo nidaamkooda, balse waxaa la iswaydiiyay maxay yihiin qaabab-dhismeedka kale ee ay aqoonsiga siiyaan dadka Soomaaliyeed. Waxay noqdeen laba arrimood: Qabiilka iyo Diinta Islaamka. Waxaa la qorsheeyay hadda in nidaamka qaab-dawladeedka reer Yurub loo dhex-geliyo marka hore nidaamka Qabiilka, maadaama dadka Soomaaliyeed ay wixii qabiilku ama nin reerka ah wado siiyaan aqoonsi, sidaasna laga yaabo inuu ku meel maro qaab-dawladeedka reer Yurub ee la dhex gashtay qabiilka. Waxaa la qabtay ilaa 15 shirwayne qaran la isku dayayo in is-dhex gelintaas lagu fuliyo. Waxay noqotay in is-dhex galintaasi socon wayday ilaa la gaaray in la yiraahdo wixii oo idil socon waaye ee aan u samayno qaab-ka ugu sii xun ee isku daygii ugu dambeeyay is-dhex galintaan ah, kaasi oo ah nidaamka qabiilka iyo qaab-dawladeedka 4.5. Nidaamkani runtii aad ayuu u gilgilay ummadda Soomaaliyeed, meelo khatar ahna gaarsiiyay, iyadoo dhex dhigtay dagaallo fara badan. Maxsuulkii wuxuu hadda noqday in qarnigan 21-aad is-dhex gelintaasina shaqayn la'dahay. Waxaa hadda haray oo kaliya sida lagu hirgalin karo qaab-dawladeedka reer Galbeedka inuu yahay is-dhex gelinta Nidaamka Islaamka ah iyo qaab-dawladeedka reer Yurub. Waxaa hadda socdaana waa is ogolaysiinta iyo is-diidka labadan nidaam. Waxaan sugnaa qarnigan 21-aad waa isku daygii ugu dambeeyay ee ka dhaqan gelinta dhulka Soomaaliyeed qaab-dawladeedka reer Galbeeka.

Dhul-ballaarsiga iyo is-fidinta awoodeed ee Itoobiya iyo Is-difaacidda Soomaaliya.

Soomaaliya iyo Itoobiya waxaa ka dhexeeyay dagaallo soo jireen ah muddo dhowr qarni ah. Dagaaladdaasi inta badan waxay salka ku hayeen kala duwanaanshaha diimeed ee labada dal iyo is-fidintii awoodeed ee boqarradii Itoobiya. Qarnigan 21-aad waxaa la filayay in xaaladdu is bedelayso, maadaama caalamku u jihaystay tartan dhaqaale oo is-fidintu yeelanayso qaab tartan shirkado, midba ka furanayso tan kale degaan ay ka hawl gasho ee Geeska Afrika. Nasiib-darro Itoobiya waxay wali isticmaalaysaa siyaasaddii dhowrka qarni soo socotay. Iyadoo maanta aysan Soomaaliya ka jirin dawlad dhexe oo dalka ka wada talisa, Itoobiya waxay ciidamo ku qabsatay Soomaaliya. Waxaa muuqata in madaxda hadda jirta ee Itoobiya ay ka dhabeeyeen riyadii awoowayaashood u hirgali wayday. Sida ku cad taariikhda casriga ah ee labada waddan, waxaa dhex maray dagaal qaraar sannadihii1964-kii, 1977-78-kii. Dagaalkani wuxuu ahaa kii ugu cuslaa uguna waynaa casrigan ee ka dhaca qaaradda Afrika. Wuxuu ahaa mid daba socda tartankii awoodeed ee qarniyada ka soo dhexeeyay labada dal. Dagaalkaasi wuxuu isbedel wayn ku keenay qaab-dawladeedkii labada dal, iyadoo ay burbureen labadii maamul ee ka kala talinayay ee ay kala hoggaaminayeen Jaalle Maxamed Siyaad Barre iyo Mingistu Hayle Maryam. Hase yeeshee, Soomaaliya gabi ahaan way burburtay dawladdii dhexe halka Itoobiya ay awooddii la wareegeen jabhadihii dagaalka kula jiray ee ay Dawladda Soomaaliya caawin jirtay si ay u ridaan maamulkii Derg ee Itoobiya. Jabhadahaas ay labadii maamul ee Soomaaliya iyo Itoobiya kala taageerayeen, waxay kuwii Itoobiya la wareegay si waddaninimo ku jirto u badbaadiyeen dalkoodii kaddib markii ay tuureen Mengistu, halka jabhadihii Soomaaliya xukunka ka tuuray dawladdii Maxamed Siyaad ay dalkii burburiyeen wax waddaniyad ahna aysan muujin. Waxaa, sidoo kale, nasiib-darro noqotay in jabhadihii Itoobiya ay si ka xun maamulladii soo maray Itoobiya ula dhaqmeen Soomaaliya. Jabhadahaas oo uu hoggaaminayay Meles Zenawi, kaasoo ku noolaa Muqdishu, isla markaana ku safri jiray Baasaboor Soomaali ah. Wuxuu ku guulaystay inuu hal waraf laba shimbirood ku dilo. Wuxuu isticmaalay taageeradii dhaqaale, militari, siyaasadeed ee Dawladdii Soomaaliyeed, isagoo sidaas kula wareegay awooddii Itoobiya, isla markaana wuxuu kaddib fuliyay riyadii awoowayaashiis ee ahayd inay maalin uun qabsadaan dhammaan Soomaaliya.

XALKA GEESKA AFRIKA: NABAD, HORUMAR IYO IS-KAASHI.

Faa'iidooyinka Qaabka Is-kaashi & is-faham.

Geeska Afrika wuxuu ka mid yahay goobaha xagga istiraatijiyadda caalamka ugu muhiimsan maadaama ay maraan marinnada ganacsi ee isku xira qaaradaha Yurub, Aasiya, iyo Afrika. Gobolku wuxuu leeyahay khayraad dabiici ah oo aan weli laga faa'iidaysan, iyadoo waddamada gobolku yihiin kuwa ugu faqrisan caalamka, uguna nabadgelyo xun. Ka hor imaatinkii guumaystayaashii reer Yurub, gobolka Geeska Afrika dadkiisu waxay ku noolaayeen nolol degan, isku-filaansho xagga dhaqaalaha iyo sancada, ay ka jirto nabadgelyo buuxda, iyadoo jawiga hawadu iyo degaankuba ay ahaayeen isla kuwa ay maanta ku nool yihiin. Kaddib imaatinkii guumaystayaashii reer Yurub gobolku wuxuu isu rogay goob colaadeed, faqri, iyo dhaqaale xumo joogto ahi haraysay. Waxay guumaystayaashii burburiyeen dhammaan qaababkii dhaqan-dhaqaale, bulsho-horumarineed, wada-deganaansho iyo walaaltinnimo ee soo jireenka ahaa. Waxayna kala qoqobeen qoysas iyo caa'ilooyin, iyagoo xuduudyo beeneedyo u sameeyay, halkaasna ilaa maanta gobolku uu ku jiro nolol-xumada ugu daran caalamka.

Haddaba, waddamada Geeska Afrika waxay ku soo ceshan karaan karaamadoodii, noloshoodii, xoriyadoodii, kulana qabsan karaan waddamada horumaray ee qarnigan 21-aad waa iyagoo iska kaashada xag dhaqaale, ganacsi, iyo bulsho, iskuna fura xuduudyo beeneedyada.

*** Soomaaliya: baaxadda dhul: 637,657 sq km; Tirada dadka: qiyaas 12 milyan**
*** Ethiopia: baaxadda dhul: 1,127,127 sq km; Tirada dadka: 82.5 milyan**
*** Kenya: baaxadda dhul: 582,650 sq km; Tirada dadka: 38 milyan**
*** Eriteria: baaxadda dhul: 121,320 sq km; Tirada dadka: 5.5 milyan**
*** Djibouti: baaxadda dhul: 23,000 sq km; dadka: 0.5 milyan**

***waa qiyaasta Juulaay 2008, The World Fact Book.**

Waddamada Soomaaliya, Ethiopia, Kenya, Djibouti, iyo Eriteria waxay ku fadhiyaan dhul baaxaddiisa lagu qiyaasay 2,491,754 sq km, iyadoo ay ku nool yihiin dad lagu qiyaasay 138.5 milyan, tiradaas oo ku dhow midda dadka Ingiriiska iyo Jarmalka. Khayraadka waddamada Geeska Afrika waa mid ku filan, amaba ka badan haddii laga faa'iidaysto. Waxaa laga helaa macdamaha qaaliga ah sida Gold, Uranium, Platinium, Copper, Natural Gas, oil reserves, iyo waliba khayraadka beeraha iyo xoolaha, iyadoo gobolka ay ku nool yihiin xoolaha ugu badan Afrika. Gobolku wuxuu leeyahay badaha iyo wabiyada ugu muhiimsan Afrika xag wax soo saar iyo xag ganacsiba.

Waxaase nasiib-daro ah in caalamku ku tilmaamo sannad walba in ay dadkiisu u dhimanayaan gaajo iyo cudurro, gurmad deg-deg ahna loo sameeyo. Is-kaashiga Gobolku wuxuu ka hortagayaa, xalna u helayaa dhaqaale-xumida iyo faqriga hareeyay dadkiisa.

Haddii aan soo qaadanno Soomaaliya maxaa faa'iido ugu jira is-kaashigan?

Waxaa dhici karta in lala yaabo fakarkan oo la yiraahdo sidee is-kaashi noo dhex mari karaa cadowgeenii soo jireenka ahaa, nagana haysta weli dhul Soomaaliyeed. Waa arrin gar ah in xal loo helana u baahan. Soomaaliya waa dal muslim ah 100%, iyadoo tirada dadka ku nool lagu qiyaasay 12 milyan oo kuwa qurbaha iyo qaxootigu ku jiraan. Shacabkaasi waxay halgan dheer oo taariikhi ah ugu jireen sidii ay diintooda u difaacan lahaayeen, tan iyo markii Islaamku soo gaaray. Waxaa colaad fogaatay dhextiil/taalaa kuwa Ethiopia oo maamulayaashoodu ay diinta kiristaanka haysteen/taan. Hase Yeeshee maanta Ethiopia waxaa ku nool dad lagu qiyaasay 82.5 milyan. Tiradaas waxaa muslim ah in ka badan 28 milyan. Dadkaas muslimiinta ah waxay la qiimo iyo sharaf yihiin kuwa Soomaaliya, iyagoo waliba tira ahaan aad uga badan Soomaaliya. Intaas waxaa dheer iyadoo dadkaasi ku nool yihiin nolol aad u liidata marka loo eego shacabka kale ee Ethiopia, gaar ahaan kuwa Amxaarada iyo Tigreega.

Is-kaashiga Geeska Afrika wuxuu keenayaa in tiro lagu qiyaasay 50 milyan muslimiin ah ay isu furmaan. Shucuubtaas Islaamka ah waxay ku nool yihiin xeebaha iyo dekadaha Geeska Afrika, taasoo u suurto gelinaysa inay hoggaamiyaan dhaqaalaha iyo ganacsiga Geeska Afrika. Arrintaasi waxay faa'iido wayn ugu jirtaa ummadda Soomaaliyeed oo ah

dad aad u fir-fircoon, kartina u yeelan kara inay hoggaamiyaan awoodda dhaqaale ee Geeska Afrika. Tusaale ahaan Kenya Soomaalidu waxay ku leedahay ganacsi xooggan, kaasoo u gudba bariga iyo bartamaha Afrika. Kenya waxaa ku nool dad lagu qiyaasay 38 milyan, iyadoo 5 milyan ay muslimiin yihiin. Hase yeeshee tirada dad ee muslimiinta ah ee Ethiopia waxay wax badan ka badan yihiin kuwa kale ee Geeska Afrika. Kenya oo sida la ogyahay haysata dhul Soomaaliyeed ayaa ka faa'iidaysatay fir-fircoonida Soomaalida una furtay suuqeeda. Waxaa hubaal ah haddii Ethiopia suuqeeda furto, kana qayb qaadato is-kaashiga Geeska Afrika in Soomaalidu si fir-fircoon uga faa'iidaysanayaan suuqaas wayn, iyagoo walaalahooda muslimiinta ahna u furaya indhaha. Taasi waxay keenaysaa iskaashi dhexmara shacabka faraha badan ee Ethiopia iyo kuwa Soomaaliya.

Fikraddan, oo laga yaabo inay hadda curdan tahay, waxay badeli kartaa qaabkii hore ee labada waddan u wada dhaqmi jireen, iyadoo Soomaalidu si dagaal la'aan ah ku soo ceshan karto dhulkii ka maqnaa, saaxiibbana ka dhex samaysan karta shacabka Itoobiya. Is-kaashiga Geeska Afrika wuxuu meesha ka saarayaa xoogga iyo caburinta ay Amxaarada iyo Tigreegu ku hayaan inta badan ee kale ee shacabka Itoobiya. Marka la soo koobo faa'iidooyinka uu is-kaashigan u leeyahay Soomaaliya waa mid aad u wayn xag dhaqaale, ganacsi iyo bulsho-horumarineed wuxuuna keenayaa:

1. In diinta Islaamku fido xag dad iyo aqoonba;
2. In Soomaalidu xag ganacsi iyo dhaqaaleba la wareegto Geeska Afrika;
3. In Soomaalida Geeska Afrika ay midoobaan, kaddib marka shucuubta Geeska Afrika la is fahmo;
4. In Soomaalidu ka faa'iidaysato xag xadaarad, wadanninimo iyo wada noolaansho shucuubta kale ee Geeska Afrika;
5. In Soomaalidu is jeclaato, illowdana colaadda dhexdeeda ah, maadaama ay la dhaqmayaan dadyoow kale, halkii ay ayagu isu muuqan lahaayeen;
6. In magaalooyinka Soomaaliyeed ay noqdaan xarumo ganacsi oo isku xira Afrika iyo Aasiya;
7. In aqoonta la isku gudbiyo, aqoonyahanka Geeska Afrika ee dunida kale jiraana ku soo laabtaan gobolka;

8. In maalgashiga shirkadaha shisheeye uu gobolku xarun u noqdo; iyo
9. In nabadgelyo waarta ay ka dhalato Gobolka Geeska Afrika.

Gabagabadii, Gobolka Geeska Afrika fikraddani waa ka suurtoobi kartaa haddii dadka gobolka laga kala qaado caqabadaha horyaalla iyo xuduudyo-beeneedyada. Waxaa aad uga faa'iidaya ummadda Soomaaliyeed iyo muslimiinta Geeska Afrika. Waxaana habboon in Soomaalidu noqoto kuwa hoggaamiya fikraddan, una ol-oleeya sidii loo heli lahaa is-kaashi ah xag-dhaqaale, ganacsi, iyo bulsho, loona jihayn lahaa fallaarta colaadeed ee Soomaali dhexdeeda ku jihaysan.

Soo Noolaynta nidaamkii hoggaaminta iyo Xallinta Mushkiladaha ee Soomaalida ka hor imaanshihii Guumaysigii Reer Yurub.

Ka hor imaatinkii guumaysigii reer Yurub, Soomaalidu waxay lahayd qaab hoggaamineed si xor ah u shaqeeya, iyo qaab ganacsi iyo socdaal xor ah. Nidaamka dawladnimo ee markaas ka jiray degaannada waxaa hoggaaminayay oday-dhaqameedka iyo culimada. Oday-dhaqameedku isma magacaabi karin, isagoo haddii uusan u maamulin hawlaha, ay dadku ka wareejin jireen xilka, haddii uu isku adkeeyana xoog ayaa looga qaadi jiray. Oday-dhaqameedyadu waxay lahaayen gole guurti uu guddoomiyo hadba boqorka reerku, iyadoo culimadu ay saldhig u ahaayeen qaab-maamulka bulshada iyo difaacidda dalka. Hase yeeshee markii guumaysigii reer Yurub ay yimaadeen waxay bur-buriyeen qaabkii shaqo iyo nidaam ee bulshada Soomaaliyeed. Waxay abuureen oday-dhaqameedyo cusub iyo gole guurti, taasoo keentay in kuwii hore ama ay cararaan, la dilo amaba u hoggaansamaan nidaamka guumaysigu keenay, iskana qaataan xoogaa dhaqaale ah, wiilashana loo geeyo dugsiyada lagu baranayay nidaamka cusub ee guumaysigu keenay ee la doonayay in laga hirgaliyo dunida saddexaad ee u badan muslimiinta. Nidaamkaas oo aan ku falanqaynay qaybo ka mid ah buuggaan. Waxaa nidaamkii maamul ee Soomaalidu lahaan jirtay intii harsanayd sii burburiyay dawladihii dhashay kaddib xoriyaddii, kuwaas oo dhaqan galinayay nidaamka casriyaynta loo yaqaan ee reer Yurub keeneen. Nidaamkaas oo saldhiggiisu yahay in la kala saaro diinta iyo maamulka lana hirgeliyo qaab-maamulka Calmaaniyadda ku dhisan.

Kaddib burburkii dawladdii Soomaaliyeed ee 1991-kii waxaa si aad ah u soo banbaxay dhalan-rogiddii ku dhacay bulshada muddadii dheerayd. Waxaa si fool xun oo ka fog dhaqanka Soomaalida iyo Islaamkaba loo sameeyay ficillo xun-xun waqtigii dagaalka sokeeye, sida laynta odayada, culimada, haweenka, carruurta iyo dadka aqoonta leh, fara xumaynta dumarka, bililiqada aan marna la iswaydiinin xaaraan iyo xalaal, iyo burburinta dhammaan adeegyadii guud ee bulshada iyo aasaaskii nidaamka dawladnimo. Ficilladaas foosha xun waxay ka dhasheen kaddib markii dadkii laga kaxeeyay nidaamkoodii hore loona raray mid aysan bulsho ahaan asal iyo diin midna u lahayn. Si loo helo nabad iyo horumar ka hirgala Geeska Afrika waxaa lagama maarmaan ah in la soo celiyo nidaamkii hoggaanka dhaqanka iyo culimada.

Nidaam Dawlad Wanaag: kaddib dagaalka Sokeeye.

Soomaaliya oo soo martay marxalado kala duwan sida ku xusan buuggan waxaa lagama maarmaan ah in la helo nidaam ku haga waddada dawlad wanaagga, kaasoo falgalinaya qaab-maamulkii hore ee Soomaalida, Shareecada Islaamka, iyo qaab-maamulka dunidan maanta camiray. Waxaa laga maarmaan ah in la helo nidaam dawlad wanaag ka imaanaya saldhig adag oo loo sameeyo hay'ado madax bannaan oo oggolaanaya in dadku doortaan si xor ah madaxdooda, fikirkoodana si xor ah u dhiibtaan, isla markaana arrimahooda dhaqaale iyo bulsho si xor ah u maamushaan. Madaxda ay doortaan dadku qasab ma ahan inay u hoggaansanaadaan rabitaanka dawladaha shisheeye ee bari iyo galbeed, Afrikaan iyo Carab midna. Waxa muhiimka ah waa hirgalinta hay'ado adag oo dadka ku haga waddada horumarka iyo nabadda. Hay'adahani waa kuwa suuqa xorta ah, nidaamka shuurada iyo wada-tashiga, saxaafadda xorta ah ee dhaqanka suuban, maxkamadda caddaaladda ee ka madax bannaan dhammaan hay'adaha jira, u hoggaansanaanta sharciga, xuquuqda lahaanshaha hanti guurto iyo ma guurto, ciidan qaran oo dhexdhexaad ah, iyo xuquuqyo shaqsiga iyo bani'aadmigu leeyihiin sida ku xusan shareecada islaamka.

Qaabka doorashada madaxda Soomaaliyeed waxaan qabaa anigu inuu noqdo mid u cuntama dhaqanka Soomaaliyeed iyo Shareecada Islaamka kuwaas oo ah labada arrimood ee ummadda Soomaaliyeed noloshooda saldhigga u ah. Taas macnaheedu ma

ahan in ummadaha caalamka cadow loo arko ama laga faquuqnaado nidaamka caalamku ku dhisan yahay, gaar ahaan kan awoodda badan ee camiray caalamka ee reer galbeedka. Hase yeeshee, waa nidaam keenaya in Soomaalida iyo Caalamku ku wada noolaadaan xorriyad iyo ilbaxnimo. Waxaa haboon in la raaco qaab doorasho laakiin ka duwan midka Dastuurka Soomaaliya ku shaqeeyo iyo midka inta badan waddamada reer galbeedku ku shaqeeyaan. Dastuurka Soomaaliya wuxuu ku shaqeeyaa qaab doorasho ah in dadku soo doortaan xubinta golaha baarlamaanka, kaddibna xubnaha baarlamaanka ayaa doorta Madaxwaynaha dalka, isagoo magacaaba ra'iisal-wasaaraha kaasoo soo dhisa xukuumadda. Qaabka kale ee qaar dawladuhu ku dhaqmaan waa in dadku si toos ah u soo doortaan Madaxwaynaha sida Maraykanka, kaasoo soo dhisa xukuumadda. Waxaan qabaa in mid ka duwan labadaas qaab la qaato, kaasoo aan is-leeyahay wuxuu koobayaa dhaqanka iyo diinta Islaamka ee Soomaaliyeed. Nidaamkaas doorashadu waa mid sidan noqon karaya:

1. Waxaa doorashada samaynaya waa hay'adaha bulshadu ku dhisan tahay sida: Oday-dhaqameedka; Culimada Diinta Islaamka; Xirfadlayaasha kala duwan ee sharciga, dhaqaalaha, beeraha, xoolaha, hindisidda dhismaha iyo sanaacada, iwm; saraaskiisha sare ee ciidamada qalabka sida, sida militariga, booliiska, asluubta, iyo kuwa kaleba; Ganacsatada iyo qaar ka mid ah xubnaha bulshada ee hawl-karka ah;
2. Markii la gaaro in loo baahdo doorashada madaxa dalka waxaa la isugu yeerayaa qaybaha kala duwan ee kor ku xusan, iyadoo loo cayimayo tiro go'an qayb kasta, guud ahaanna tirada wax dooranaysa ay ku koobnaan karto 1500-2000 mas'uul. Xubnahaasi ka kala imaanaya dhammaan bulshada qaybaheeda kala duwan iyo dhammaan gobollada iyo degaannada dalka, waxay dooranayaan qofka noqonaya hoggaamiyaha dalka;
3. Qaabka loo soo sharaxayo dadka la kala xulanayo wuxuu noqonayaa mid ku imaanaya kala doorasho la soo koobay oo aan ka badnayn dhawr xubnood, kuwaas oo ay ku kala reebayaan cod xubnaha doorashada ee kor ku xusan;
4. Kaddib marka la doorto hoggaamiyaha dalka, wuxuu wada-shaqayn buuxda ama beeco ka dalbayaa dhammaan xubnaha doorashada ka soo qayb-galay, isagoo ka saxiixaya arrintaas;

5. Kaddibna, sidii caadiga ahayd ayaa xubnaha baarlamaanka dadku soo dooranayaan, iyadoo xukuumadda uu soo dhisayo hoggaamiyaha la doortay, balse uu ansixinayo ama diidayo baarlamaanku, iyadoo hawshii baarlamaanku ay mar kasta ahaanayso la xisaabtanka xukuumadda.

Waa maxay faa'iidada nidaamkan hoggaamiyaha ku yimaada?

1. Waxaa meesha ka baxaya qaabka musuqmaasuqa ku dhisan ee laga dhaxlay nidaamka doorashada reer galbeedka, sababtoo ah dhammaan xubnaha bulshada ee dhawrka milyan ah isku miisaan iyo isku xil midna ma ahan. Nidaamka musuqmaasuqa ku dhisan wuxuu keenayaa in la iibsado codka shacabka aan talada bulshadu ka go'in lana dhinac maro dadka miisaanka ku leh ku hagidda bulshada sida maslaxaddu ku jirto, sida Culimada, oday-dhaqameedka, aqoon-yahanka iyo dhammaan xubnaha doorashada ee aan kor ku xusay;
2. Waxaa imanaya qof hoggaamiye ah oo ay doorteen inta badan dadkii talada shacabka gacanta ku hayay, ama awoodda ciidan lahaa, iyo aqoon-yahankii wax soo saarka ku hawlanaa, sidaas ayuuna ku helayaa hoggaamiyahaas awood wax qabad oo ballaaran, isagoo noqonaya mid aan ummadda daaqadda looga soo gelin, sida ku dhacda inta badan waddamada dunida saddexaad;

Waxaa meesha ka baxaya dhaqaalaha faraha badan ee lagu bixiyo tartanka doorashada ee qaabka reer galbeedka, kaasoo malaayiin doolar lagu bixiyo iibsashada codadka dadka, iyadoo dhaqaalahaas uu waxtar badan u yeelanayo bulshada qaybaheeda kala duwan haddii meesha laga saaro nidaamka musuqmaasuqa, lana hirgaliyo nidaamka kooban ee kor ku xusan**.**

Inta kale waxaad ka bogan doontaa marka aad buuggan hesho.
Fadlan igu soo hagaaji wixii talo iyo tusaalayn ah ee buuggan ku saabsan.

Abdiweli Hassan Mohamed
Birmingham, UK
E-mail: abdihass55@hotmail.com
Tel. (44) 075 33 94 77 65

Tixraac (References).

Ayittey, G. (1994). The Somali Crisis: Time for an African Solution. Policy Analysis, No.25 (March 28, 1994).

Bozzi, L. (1960). *L'immobilismo della pastorizia Somala.* In: Rivista di Agricoltura subtropicale e tropicale, 54: 403-410.

Burton, R.F. (1894). *First footsteps in East Africa.* New York: Frederick A., Praeger publishers.

Cilliers, J. (2003). "Peace-keeping, Africa and Emerging Global Security Architecture", In: ***African Security Review.***

Heirman, M. (1998). *"Äfrika in de vuur lijn".* Antwerpen, Baarn: Hadewijch, cop.

Hess, R.L. (1966). Italian colonialism in Somalia. London and Chicago: The University of Chicago Press.

International Journal of African Historical Studies, vol.33, No.3 (2000).

Johnson, C. (2004). *The Sorrows of Empire: Militarism, Secrecy, and the end of the Republic: The American Empire Project.* New York: Metropolitan Books.

Thompson, V.B. (1995). ***The phenomenon of shifting frontiers: The Kenya-Somalia case in the Horn of Africa, 1880s-1970s.*** In: Journal of Asian and African Studies, vol.30. E.J. Brill, Leiden, New York, pp.1-40.

www.africaaction.org/featdocs/afr2003.htm

www.worldbank.org